

OPINION: Is the Land Law applied in all the regions and district or is it confined to the capital city?

For a copy of the Urban Land Management Law (as amended) see [this page](#).

www.somalilandlaw.com

19 March 2011

Xeerka Dhulku Ma Ka Shaqeeyaa Dhammaan Gobolada iyo Dagmooyinka Dalka, Mise caasimaduu u Gaar Yahay

Garyaqaan Muuse Yuusuf Maxamed

(XIGASHO: <http://www.hadhwanaagnews.com/>)

Xeerkana waxaa lagu magacaabaa (Xeerka Maamulka Dhulka Magaaloooyinka), mudo badan markii muranka dhulku ahaa wax weyn oo khalkhal geliyey nabadjelyada. Dawlada Hoose ee magaaloooyinka ayaana ah hay'ada u qaabilسان dhul bixinta.

Xeerkana waxaa lagu magacaabaa (Xeerka Maamulka Dhulka Magaaloooyinka), mudo badan markii muranka dhulku ahaa wax weyn oo khalkhal geliyey nabadjelyada. Dawlada Hoose ee magaaloooyinka ayaana ah hay'ada u qaabilسان dhul bixinta.

Xeerkana markii u horeysay waxaa lagu dhaliilay qodobkiisa 28aad oo dhigayey abuuridda gudi u eg Maxkamad oo uu gudoomiye u noqonayo Garsoore Maxkamad Degmo iyo lix xubnood oo kale, kuwaas oo ka garsooraya khilaafaadka ama dacwadaha dhulka, waxaana go'aanadooda looga rafcaan qaadanaya Maxkamada Gobolka.

Balse xeerkaasi waxaa lagu sameeyey waxka bedel (amendment) sida qodobkaasi 28aad. Imika dacwadaha waxaa qaada siduu dhigayo Waxkabedalka Xeerkaasi Gudi Maamul (Administrative Tribunal) oo qaadaysa dacwadaha dhulka magaaloooyinka. Gudidaasi waxay ka koobabtahay 7 xubnood oo 5 kamida oo uu ku jiro gudoomiyuhu ka kala imanayaan 5 wasaaradood, halka 2 xubnoodna ka imanaya dawlada hoose.

Go'aanada gudidaasi ayaa sida waxkabedalku dhigayo waxaa looga rafcaan qaadanaya Maxkamada Sare mudo bil ah ama wax ka yar.

Gudidan fadhigoodu waxaa noqonaya xarumaha dawlada hoose ee degmooyinka.

Wasiirka A/arimaha Gudaha ayuu Xeerkaasi siinayaaw awood uu ku soo saarayo Xeer Nidaamiye. Xeernidaamiyahaasina waxa uu qeexidoonaa, gunada gudida, qadarka lacageed ee ay ka qaadayaan dacwadaha furashadooda, habka dacwad qaadiseed ee ay raacayaan, xeerka ay raacayaan iyo sida loo fulinayo go'aanada ka dhamaada gudida ee aan rafcaan laga qaadan.

Waxkabedalku wuxuu cadeynaya in dacwadaha dhulka ay la wareegeen xukuumada dhewe iyo dacwadaha hoose sida ka muuqata 7 xubnood ee gudidu halkay kasoo kala jeedaan. Waxaana lagu bedelay qaabkii hore ee xeerku dhigayey ee ahaa gudi

Maxkamad u eeke ah (Quasi-Judicial). Sababta ka dembeysay taasina waxay ahayd si looga raysto qaabkii dheeraa ee Maxkamadaha u qaadaan dacwadaha. Tusaale ahaan in dacwadu socoto min Maxkamad gobol ama degmo ilaa Maxkamada Sare, iyo in kolba ishortaag iyo soodhexgale la keeno, taasi oo wakhti badan iyo dhaqaale luminaysa.

Nadiib daro, gudidaasi dalka oo dhan kama dhaqan gelin, waxa qudha oo ay ka shaqeeyaan magaalada Hargeysa oo qudha. Dalka intiisa kale oo dhanna wali waxaa qaada Maxkamadaha. Waxaase taasi kasii daran, in gudida ka shaqaysa Hargeysa aan lagaga raysan dhibtii hore u jirtay sababahan awgood:

Ma jiro Xeer-Nidaamiyihii uu soo saari lahaa Wasiirka A/guduhi, xeernidaamiyahaasi oo cadeyn lahaa, qaabka ay u raacayaan dhagaysiga dacwadaha (procedure laws), awoodooda, nooca dacwadaha ay ka reebanaanayso ka garsoorideeda, gunadooda iyo sida loo fulinayo go'aanada dooda. Mar hadaan xeer-nidaamiyahaasi jirinna sida ay u shaqaynayaan iyo go'aanadooduba sharci maaha.

Xubnaha imika shaqeeyaa, ma'aha sida xeerka dhulku dhigayo shaqaale ka tirsan wasaaradaha ay ka socdaan, balse xubno suuqa iska abaabulay ayaa warqado kazoo qortay wasaaradaha xeerku dhigayo. Taasina waa sharcigii oo lagu tuntay.

Xeerarka Maxkamaduhu raacaan ee wakhtiga dheeraynayey ee dhibka keenayey ayuunbay kuwanina isticmaalaan, markaa maxaa isbedelay.

Gudida imika shaqaysaa waxay dulfuulaan dadka xaga lacagta maadaama aanuu jirin xeernidaamiyihii gunadooda u goynlahaa. Taasina waa dhibaato soo korodhay.

Guditani waxay ka garsooraan wax alla wixii maxkamaduhu ka garsoori lahaayeen. Dhulka ay ka garsooraan sida xeerku dhigayo waa inuu ahaadaa magaaloooyinka oo qudha, waxayse galaan si ay lacag uga helaan dhamaan dacwadaha sida kuwa beeraha iyo dhulka reerguuraaga.

Guditani iyagaa is abaabulay oo xafiiska xaadhxaadhy una dadaalay sidaa ay warqado magacaabis ah uga soo dhamaysan lahaayeen wasaaradihii ay khusaysay. Taasina waxay muujinaysaa inay yihin dad aan la magacaabin oo dano gaar ah leh.

Waxaa kale oo igu maqaalo ah in cabasho badani ka soo yeedhayso qaabka ay u maamulayaan gudidaasi dacwadaha taani waxaa keenaya xeernidaamiye la'aanta ay ku shaqaynayaan.

TALO BIXIN.

- In si ku meelgaadh ah loo hakiyo, dibna loo eego qaabka guditani ku timid iyo sida ay u shaqeeyaan;
- In wasiirka arimaha guduhi soo saaro xeernidaamiye hufan oo ku qotoma waxkabedalka xeerka dhulka;
- In gobolada dalka laga wada hirgeliyo gudida;
- In gudida la isugu dheelitiro qaab saami qaybsiga beelaha dalka; iyagoo kuwa imika shaqeeya lagu xanto ina ay dhinac u badan yihin, keentayna kalsooni darro;
- In la hirgeliyo gudi maamul lagana joojiyo kuwan xeerarkii maxkamadaha ee dheeraynayey dacwadaha ee ay isticmaalayaan.